

M-CHAT-R™ Final

Fadlan ka jawaab su'aalahan ku saabsan Ilmahaaga. Xusuusnow sida uu badanaa Ilmahaaga u dhaqmo. Haddii aad aragtay Ilmahaaga oo sidaas u dhaqmaya dhowr jeer oo kaliya, balse isagu ama iyadu aysan inta badan sameeynin sidaas, fadlan jawaabtaada hanoqoto **maya**. Fadlan goobaabi **haa** ama **maya** suaal kasta. Aad baad u mahadsantahay.

1. Haddii aad u tilmaantid wax yaalla qolka dhinaciisa kale, Ilmahaaga ma fiiriyaa? (Tusaale, haddii aad u tilmaantid alaabta ciyaalka kuciyaaraan ama xayawaan, Ilmahaaga ma fiiriyaa?)	Haa	Maya
2. Waligaa ma u malaysay in Ilmahaaga dhagool yahay?	Haa	Maya
3. Ilmahaaga miyuu iska yeelyeela in uu ciyaaraayo ama iska dhaadhiciyaa? (Tusaale ahaan, ma iska yeela in uu ka cabaayo koob maran, in uu ku hadlaayo telefoonka, ama sidii in uu quudinaayo boombale ama xayawaanka dharka laga sameeyay?)	Haa	Maya
4. Ilmahaaga ma jecelyahay inuu meelaha kor u fuulo ? (Tusaale ahaan, alaabta guriga, qalabka lagu ciyaaro, jaranjarada)	Haa	Maya
5. Ilmahaaga miyuu u dhaqdhaqaaqiyaa faraha si aan caadi ahayn indhaha agtooda? (Tusaale ahaan, Ilmahaaga maku dhaqdhaqaaqiyaa faraha indhihiisa agtooda)	Haa	Maya
6. Ilmahaaga miyuu ku tilmaami karaa hal far waxa uu dooneyo in la siiyo ama laga caawiyo? (Tusaale ahaan, [farta] maku tilmaamaa cunto ama alaabta ciyaalka kuciyaaraan uusan gaari karin?)	Haa	Maya
7. Ilmahaaga miyuu ku tilmaama hal far si uu kuu tuso wax xiiso leh? (Tusaale ahaan, farta miyuu ku tilmaamaa diyaarad hawada mareeysa ama gaari weyn oo jidka maraya)	Haa	Maya
8. Ilmahaaga miyuu xiiseeyaa ilmaha kale? (Tusaale ahaan Ilmahaaga miyuu daawadaa ilmaha kale, u dhoola caddeyaa, ama u tagaa?)	Haa	Maya
9. Ilmahaaga miyuu ku keena ama kor kuugu qaadaa waxyaaba si uu kuu tuso-ma'ahan si uu caawin u helo balse in uu kula wadaago? (Tusaale ahaan, asagoo ku tusaayo ubax, ama xayawaanka dharka laga sameeyay, ama gaariga ilmaha ku ciyaaraan)	Haa	Maya
10. Ilmahaaga miyuu kuu jawaabaa marka aad wacdo magaciisa ama magaceeda? (Tusaale ahaan, kor miyuu fiiriyaa, hadlaa ama hadaaqaa, ama joojiyaa wixii uu sameeynaayay marka aad wacdo magaciisa?)	Haa	Maya
11. Markaad u dhoola caddeysid Ilmahaaga miyuu kuu dhoola caddeyaa?	Haa	Maya
12. Ilmahaaga miyuu dhibsadaa shanqarta caadiga ah? (Tusaale ahaan, Ilmahaaga miyuu ka qayliyaa ama ka ooyaa shanqarta huufarka (fakuum) guriga lagu xaaqo ama muusiga aad u dheer)	Haa	Maya
13. Ilmahaaga miyuu socdaa?	Haa	Maya
14. Ilmahaaga miyuu ku fiiriyaa marka aad la hadleeyisid, la ciyaareeyisid, ama dharka u xireeysid?	Haa	Maya
15. Ilmahaaga miyuu isku dayaa in uu ku daydo waxa aad sameeyneeyso? (Tusaale ahaan, Gacan-haadiska nabadgalyo (bye-bye), sacbin, ama sameeyaa dhawaqyo qosol leh marka aad sameeyso)	Haa	Maya
16. Madaxaaga haddii aad jeedisid si aad wax u fiirisid, Ilmahaaga miyuu is jeediyaa si uu u arko waxa aad fiirinaysid??	Haa	Maya
17. Ilmahaaga miyuu isku dayaa in uu kusoo jeediyoo si aad u daawatid asaga? (Tusaale ahaan, Ilmahaaga miyuu kuu fiiriyaa si aad u amaantid, ama miyuu dhahaa "i fiiri" ama "i daawo.")	Haa	Maya
18. Ilmahaaga miyuu fahmaa marka aad u sheegtid in uu wax sameeyo? (Tusaale ahaan, adigoon u tilmaamin, Ilmahaaga ma fahmi karaa "buugga kursiga dul saar" ama "ii keen busto")	Haa	Maya
19. Haddii ay wax cusub dhacaan, Ilmahaaga miyuu fiiriyaa wajigaada si uu u ogaado sida aad dareemeysid? (Tusaale ahaan, haddii uu maqlo shanqar qalaad ama qosol leh, ama arko alaabta ilmaha kuciyaaraan, wajigaada miyuu fiiriyaa?)	Haa	Maya
20. Ilmahaaga miyuu jecelyahay hawl ciyaareedyada dhaqdhaqaaqa leh? (Tusaale ahaan, in la lulo ama jilbaha lagu boodbootiyo)	Haa	Maya